Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka (DCSD),

Waxaan rajeynayaa in macalimiinteena ay dareemeen jaceyl iyo mahadcelin isbuuca la soo dhaafay inta lagu jiray Isbuuca Mahadcelinta Macalimiinta. Aad ayaan ugu faraxsanaa inaan arko sawirada lagu wadaagay warbaahinta bulshada ee ardaydeena, maamulayaasha dugsiga iyo bulshada oo siinayo macalimiinteena hadiyado, cunto, qoraalo iyo waraaqaha mahadnaqa, iyo guud ahaan mahadcelinta.

Markale, waxaan rabaa inaan u mahadceliyo dhammaan macalimiinteena oo wax walba oo ay u sameeyeen aqoonyahanadeena iyo degmada. Waxaan rajeynayaa inaan sii wadeyno inaan jaceyl u muujino macalimiinteena iyo xubnaha shaqaalaha markaan xireyno sannad dugsiyeedkaan.

Hawo Sifeeyaha

Isbuuca la soo dhaafay, waxaa lagu dhawaaqay in DCSD ay heleyso xalka nadiifinta hawada UVC ee farshaxanka gobolka Healthe, waxaa mahad leh deeqda deeqsiga ah ee ka imaatay bulshada iyo ganacsiga Atlanta. Healthe Inc. iyo Operation HOPE ayaa ugu deeqay 100 Healthe AIRTM oo saqafka hawada ee DCSD.

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Healthe, Inc. iyo Operation HOPE oo deeqdaan deeqsiga ah. Waaxda Xarumaha iyo howlgalada DCSD waxay maalin walba ka shaqeysaa si ay u hubiso in dhismooyinkeena ay nadiif u yihiin aqoonyahanadeena iyo shaqaalaha. Deeqdaan waxay ku caawineysaa xoojinta dadaaladooda lagu yareynayo fayraska hawada ku jiro.

Markii dugsiyada ku meelgaaraan waxbarashada isku dhafka, DCSD waxay ku sameysay dayactir dhammaan qeybaha HVAC, oo ay ku jiraan nadiifinta iyo badelada fiiltarka. Intaas waxaa dheer, howlgalada qeybaha HVAC ee loo saxay sida ku haboontahay si loo kordhiyo hawo siinta sida waafaqsan CDC iyo tallooyinka warshada. Xalalka nadiifinta hawada cusub waxay xoojineysaa xeeladaha yareynta hadeer si loo yareeyo faafida suurtogalka ah ee bakteeriyaha sida SARS-CoV-2, fayraska sababo COVID-19.

Aqbaaro fiican

Isbuuca la soo dhaafay waxaa ka buuxay aqbaaro badan oo wanaagsan ee loogu tallogalay aqoonyahanadeena iyo shaqaalaha.

Fadlan igula soo biir u hambalyeynta ardayga dugsiga sare ee ka qalinjabineyso Machadka Kulliyada DeKalb Early, Kalya Eades, ee deeqdeeda waxbarasho ee $5,000 ee ka imaaneyso Home Depot. Waxay ku guuleysatay deeqda waxbarashada kadib qorista maqaal ku saabsan hamigeeda oo warshada dhismaha. Kalya waxay ka qeyb tahay SkillsUSA ee Dugsigeena Sare ee

Farsamada DeKalb ee xarunta Wuqooyiga. Hambalyooyin Kalya oo deeqdaan waxbarashada cajiibka ah!

Sida bulsho, aan u dirno dareen wanaagsan Dugsiga Dhexe Tucker sida ay sugayaan inay arkaan haddii ay ku guuleysteen $15,000 ee Samsung. Dugsiga horaan ayuu ugu guuleystay $65,000 ee cilmiga farsamada Samsung oo waxaa lagu magacaabay mid ka mid ah Finalistayaasha Qaranka 10aad ee sannadka 11aad ee Tartanka Samsung Solve for Tomorrow –tartanka waxbarashada wadanka oo dhan oo la tartamo ardayda fasalada 6-12 si ay u isticmaalaan STEM xirfadaha (sayniska, cilmiga farsamada, injineernimada, iyo xisaabta) ee lagu sheegayo arimaha deegaanka oo dhiirogeliyo isbadelka bulshooyinkooda. Bishaan, Samsung waxay ku dhawaaqeysaa ku guuleystayaasha Abaalmarinta Dooqa Bulshada, oo ay la jiraan $15,000, oo waxaan rajeyneynaa aqoonyahanadeena cajiibka ah ee Dugsiga dhexe Tucker ay ku guuleystaan!

Ugu dambeyntii, waxaa la jira xamaasad weyn oo aan ugu hambalyeeyo Waaxdeena Isgaarsiinada, ku guuleystaha ee Abaalmarinada Communicator Sannadka 27aad. Waaxda waxay ku guuleysatay Abaalmarinta Heerka sare ee Shirkada Isgaarsiimaha-Wargelinta Sannadlaha ee loogu tallogalay shaqadeeda ee Wargelinta 100 ka Maalin ee Kormeeraha guud Cheryl Watson-Harris. Abaalmarinta Communicator waa barnaamij abaalmarinada ugu balaaran iyo ugu tartanka badan ee sharfeyso hal abuurka heerka sare ee xirfadlayaasha isgaarsiimaha. Waxay u tahay guul cajiib ah kooxda Isgaarsiimaha iyo degmada. Waan ku faraxsannahay aqoonsiga dadaalkeena iyo in lagu sharfo hay'adaha kale ee qadarinta leh!

Shaqaalaha Sannadka

Isbuucii la soo dhaafay, waxaan yeelanay sharafeyn weyn ee loogu dalaabdagayo shaqaalaheena sannadka oo xaflad yar ah. Waxaa mahad leh jaalkeena, Ururka Deynta Georgia United, oo hadiyadooda deeqsiga ah ee ku aadan shaqaalaheena sannadka. Hambalyooyin markale guuleystayaasha sannadkaan!

Qalinjabinta Heerka Koowaad iyo Heerka Labaad ee 2021

Waxay aheyd farxad in loo dabaaldago Qalinjabinta Heerka Koowaad iyo Heerka Labaad ee 2020-2021 isbuuca la soo dhaafay ee dabaaldageena gaariga lagu jiro! Way wanaagsaneyd inaan arko wajiyadiina oo dhan oo aan idin kula dabaaldago guulahiina qaraabadiina. Aad ayaan idinku faanaa oo waxaan rajeyneynaa inaan aragno waxyaabaha ugu wanaagsan ee aad sameyneysaan mustaqbalka!

Balooga TNTP

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Dugsiga Sare Southwest DeKalb alum Shanequa Yates oo i wareysigooda ku saabsan Mashruuca Macalinka Cusub (TNTP) balooga. Waxaan helay fursada looga hadlayo dadaalka degmada ee lagu xoojinayo aqoonyahanadeena ee lagu dhiirinayo, laguna gaarayo, oo lagu hormarinayo. Waan u mahadcelinayaa Shanequa iyo shaqada ay la sameyneyso TNTP, iyo iskaashigooda la leeyihiin degmada. Marwalba waa farxad in la arko ardaydeena hore oo hormareyso.

Maalinta Dalxiiska

Arbacadii la soo dhaafay, waxaan ku farxay inaan booqdo hogaamada dugsiga iyo ardayda ee Dugsiga Hoose Stone Mill, Dugsiga Hoose Dresden iyo Dugsiga Sare Cross Keys. Waad ku mahadsantihiin hubinta in aqoonyahanadeena inay hayaan wadada guusha! Waan jeclahay inaan ku arko hogaamada oo howlgal ku jiro oo waxaan rajeynayaa inaan idinkoo badan idin soo booqdo bishaan. Maalinta Dalxiiska waa fursad wanaagsan ee lagu joogteynayo isgaarsiimaha labada qaab oo howlgalka oo dhan.

Barnaamijka Waxbarashada Kuleelaha MOSAIC

Sida aan u soo dhawaaneyno dhammaadka sannad dugsiyeedka, waxaan rabaa inaan xasuusiyo aqoonyahanadeena, waaladiinta/masuulada iyo shaqaalaha DCSD ee soo socdo Barnaamijka Waxbarashada Kuleelaha MOSAIC. Barnaamijka wuxuu taageeraa muhiimada waxbarashada ee dugsiga degmada—ardaydeena, iyo macalimiinta, iyo tusmada la baray iyo la bartay—oo dhinaca dhexdhaxaadinta, dadajinta, kobcinta iyo waxbarashada dareenka bulshada.

Yoolkeena waa ka qeybgelinta dhammaan ardayda oo ay ku jiraan ardayda af Ingiriiska, ardayda curyaanka ah, iyo ardayda hibbada. Inta lagu jiro waxbarashada waji-ka-wajiga, la isku dhafay iyo fogaanta ah, ardayda waxay ka qeybgaleysaaa waaya aragnimo dhab ah, ka qeybgal leh, oo wax ku ool ah, iyaga oo ka faa'idayo waxbarashada macalinka hogaamiyo iyo casharada ay ardayda lagu jaheeyay ee ula kaca ah.

Si aad wax badan uga baratid Barnaamijka Waxbarashada Kuleelaha MOSAIC, riix halkaan.